



James John iyo West Sylvan oo ku guuleystay horyaalada gobolka ee Loolanka Buugaagta ‘Battle of the Books’

Laba kooxood oo ka socda Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa ku guuleystay horyaalada gobolka ee Loolanka Buugaagta ee Oregon ‘Oregon Battle of the Books’ oo Abriil 6 ka dhacay Kulliyadda Bulshada Chemeketa ee ku taala Salem. Kooxda Dugsiga Hoose ee James John ayaa ku guuleystay horyaalka fasallada 3-5, iyada oo kooxda Dugsiga Dhexe ee West Sylvan ay ku adkaatay qaybta 6-8.

Kooxda James John, oo lagu naaneyso Wax akhriyayaasha Rose City, ayaa ka soo dhex baxay koox ka kooban 56 arday oo ku tartamay Loolanka Buugaagta ‘Battle of the Books’ ee dugsiga. James John ayaa markii u horeysay ku guuleystay horyaalka gobolka isaga oo ku soo biiray saddexda dugsi oo kale oo ka tirsan PPS ee qaybta 24-kooxood ka kooban ee gobolka, oo ay weheliyaan Abernethy, Rieke iyo Duniway.

Marka la eego qaabka gobolka ee muujinaya qaybta u soo baxday tartanka, James John ayaa Helman oo ka socda Ashland kaga guuleystay tartankii kama dambeysta ahaa si uu markii u horeysay ugu guuleysto horyaalka gobolka. Kooxda James John waxaa ku jiray ardayga fasalka shanaad dhigta ee Zayd Faruqi iyo ardayda fasalka afaraad dhigata ee Zahra Faruqi, Claire Streib, Brody Reid iyo Adahlia King.

“Waa wax wanaagsan in la arko koox ay si xoogan wax uga go’an tahay isla markaana si xoogan midba midka kale u taageerayo,” ayuu sheegay Robin Rolfe oo ka socda James John ee takhasusay warbaahinta, oo ah tababaraha James John. “Waxay u shaqeeyeen si adag, iyada oo bulshada James John ay u riyaaqeen iyaga ilaa iyo intii ay tartanka ku jireen !”

Kooxda West Sylvan, oo lagu naaneyso Biblioferrets IV, ayaa ku guuleystay qaybta dugsiga dhexe iyada oo kooxdu ka koobnayd ardayda dhammaantood dhigata fasalka lixaad -- Anna Carlson, Isaac Carlson, Gabriela Hampsey iyo Valerie Sundberg.

Kooxda ayaa ka soo dhex baxday meel ka kooban 100 arday oo u tartamay Loolanka Buugaagta ‘Battle of the Books’ ee West Sylvan. West Sylvan ayaa markii ugu horeysay ku guuleysatay gobolada, isaga oo ku soo biiray dugsiga dhexe ee kale ee ka tirsan PPS, ee Mt. Tabor, oo ay dhacday in uu baxo ciyaaraha dheeraad ah. Biblioferrets IV ka dib waxay ka reeyeen qaybta 21-kooxood ka kooban ee gobolka, iyaga oo ka guuleystay Mountain View oo ka socday Newberg taasi oo ahayd ciyaartii horyaalka.

“Kooxdani si fudud ayay u gudubtay waxayna u guuleysatay si sahlan,” ayuu sheegay Jules Angyus, oo ah kaaliyaha maktabadda ee West Sylvan ahna tababaraha. “Aad ayaanu ugu faraxsanahay iyaga.”

Saddexda kooxood oo ka socda PPS -- Madison, Lincoln iyo Wilson—ayaa tartamay gobolka kaasi oo ah qaybta dugsiga sare (fasallada 9-12). Wilson ayaa meel dheer gaaray, isaga oo gaaray sideeda kooxood ee u dambeeya.

Loolanka Buugaagta ee Oregon 'Oregon Battle of the Books' wuxuu bilaabmay 2007-08 isaga oo ah hab lagu ballaarinayo xiiseynta wax akhriska ee ardayda, kor loogu qaadayo fahamka wax akhriska isla markaana lagu dhiirigelinayo tacliin heer sare ah, waxbarasho la iska kaashanayo iyo wada shaqeyn kooxood. Waxaa maalgeliyay Ururka Maktabadaha Dugsiga ee Oregon iyada oo la kaashanayo Xeerka Adeegyada Maktabadaha iyo Tiknoolajiyada lacagta uu leeyahay. Liiska buuga ee loogu talagalay Loolanka Buugaagta ee Oregon 'Oregon Battle of the Books' ee 2019-20 [waxaa laga helaya website-ka tartanka](#).